



## DIFAACA BULSHADA – CAASIMADA TUKWILA

City Administrator's Office  
6200 Southcenter Blvd  
Tukwila WA 98188  
206-433-1850  
[publicdefense@tukwilawa.gov](mailto:publicdefense@tukwilawa.gov)

### XAQUUQDA MACAAMIILKA

Sida macaamiilka difaaca bulshada waxaad leedahay xaquuq muhiim ah. Maxkamada Sare ee Gobalka Washington waxay soo saareen heerar oo dhaqanka difaacayaasha bulshada iyo tilmaamaha bixinta adeegyada ay ku siiyaan difaaca bulshada. Ogeysiintaan adiga ayaa lagu siiyay sida macaamiil difaacaha bulshada ah si lagu ogeysiyo xaquuqdaada sida waafaqsan heerarkan iyo kaala taliyo talaabooyinka la qaado hadii aad u maleysay xaquuqdaada, sida lagu sheegay hoos, waa lagu xadgudbay.

Xaquuqdaada waxaa ku jira:

- Kulamo qarsoodi ah oo abuukaatahaada ah;
- Talooyin sharci oo dacwadaada ku saabsan;
- Fahamka iyo ogolaanshaha wixii heshiis qirasho oo dacwadaada ah.

### WAXAAD XAQ U LEEDAHAY IN AAD GUDBISO CABASHO

Hadii aad aaminsantahay in xaquuqdaada lagu xadgudbay waxaad xaq u leedahay in aad gudbiso cabasho. Cabashooyin badan waa la xalin karaa adigoo si toos ah u la hadlayo difaaca bulshadaada.

Hadii aadan la hadli karin difaaca bulshadaada ama aad rabtid in aad gudbiso cabasho Magaalada Tukwila ah adigoo kula xiriirayo qoraal ahaan ama taleefon xafiiska Maamulaha Magaalada. Caasimada waxay leedahay foomka faalo guud/cabasho oo laga heli karo onleenka maxkamada deegaanka. Intaas waxaa dheer faalooyinka guud ama cabashooyinka Caasimada sidoo kale waxay leedahay foom aad buuxin kartid hadii aad aaminsantahay 1) in lagu diiday la kulanka difaaca bulshadaada si aad ugala hadashid dacwadaada ama 2) heshiis qirasho ah oo la geliyay dacwadaada oo aadan fahmin ama aadan ogolaan.

### SIDA NIDAAMKA CABASHOYINKA U SHAQEEYO

Hadii aad rabtid in aad soo gudbiso cabasho gaar ah waa in aad sameysaa sidaa **qoraal ahaan 15 maalmood gudahood** oo taariiqda lagu diiday la kulanka Difaaca Bulshada ama qirashada heshiiska waxaa la geliyay dacwadaada. Fadlan u soo gudbi cabashooyinka dhammaan xafiiska Caasimada Maamulka ee 6200 Southcenter Blvd. Tukwila WA 98188 ama i-meel ahaan ku soo dir [publicdefense@tukwilawa.gov](mailto:publicdefense@tukwilawa.gov).

Xiliga helida cabashada qoraalka ah, Caasimada waxay haysataa 30 maalmood oo lagu baarayo cabashada iyo jawaabta. Caasimada lagama rabo in ay ka jawaabto ama ay qaado ficil kale oo dheeraad ah hadii aadan markale matalin difaaca bulshada xiliga lagu gudo jiray cabasho 30



## DIFAACA BULSHADA – CAASIMADA TUKWILA

City Administrator's Office  
6200 Southcenter Blvd  
Tukwila WA 98188  
206-433-1850  
publicdefense@tukwilawa.gov

maalmood ah ama hadii lagu xirro amar qabasho ah oo laga soo saaray meel walba oo Gobalka Washington ah ama Dawlada Federaalka.

Hadii lagu diiday in aad la kulanto difaaca bulshadaada, Caasimada waxay balamineysaa waqti oo aad kula kulantid difaaca bulshada sida ugu dhaqsaha badan oo suurtoogalka ah markii lahelu cabashada kadib, laakin aan ka dambeynin 15 maalmood markii la helo cabashada.

Hadii heshiis la qirtay la geliyay dacwadaada adigoo fahmin iyo ogolaanin, caasimada waxay weydiineysaa xeer ilaalayaha si loo soo gudbiyo go'aan lagu firaqeynayo heshiiska qirashada 30 maalmood gudahood oo helida cabashada ah. Go'aanka laga yaabo in uusan taageerin difaaca bulshada iyo laga yaabo in aan lagaaga ansixin maxkamada. Hadii xeer ilaalayaha uu diido in uu gudbiyo go'aanka lagu firaqeynayo qirashadaada Caasimada waxay u gudbineysaa cabashadaada Maxkamada Deegaanka ee Tukwila iyo Ururka Qareenada Gobalka Washington.

Ogolaanshaha iyo socodsiinta cabashadaada Caasimada ma sameyneyso wax xukun ah oo difaaca bulshada uu ku xadgudbay xaquuqdaada ama uu sameeyay wax qalad ah. Caasimada waxa sameysaa xaqa lagu joojinayo nidaamka cabashada oo dacwad kasta ah hadii baaritaanka uu sheego macaamiilka in uu ku xadgudbay nidaamka.

Caasimada Tukwila waxay kaliya oo qaadaa cabashooyin ama walaacyo ku saabsan difaaca bulshada oo ay magacawday Maxkamada Deegaanka ee Tukwila. Caasimada ma baari karto cabashooyinka ka soo horjeedo garyaqaanada gaarka ah, garsoorayaasha, xeer ilaaliyaasha ama garyaqaanada ee sharciyada kale ah. Kaliya difaacaha ayaa laga yaabaa in uu soo gudbiyo cabasho. Caasimada ma ogolaanayaan cabashooyin ka imaaneyso xubnaha qoyska ama xisbiyo kale oo sadexaad oo matalayo difaacaha. Caasimada sidoo kale ma ogolaaneyso cabashooyin qarsoon.

Waxaad sidoo kale u gudbin kartaa cabasho qoran oo garsooraha Maxkamada Deegaanka ee Tukwila hadii aad aaminsantahay xaquuqdaada sida macaamiilka difaaca bulshada in lagu xadgudbay. Hadii cabashadaada ay ku saabsantahay nidaamka sharciga difaaca bulshada wuxuu u isticmaalayaa dacwadaada ama nooca talada sharciga oo aad heshay waa in aad la xiriirtaa Maxkamada Deegaanka ama Ururka Garyaqaanada Gobalka Washington.

Ururka Garyaqaanada Gobalka Washington wuxuu nidaamiyaa dhaqanka garyaqaanka iyo baari karaa iyo edbinta karaa garyaqaan kasta oo ku xadgudba xeerarka dhaqanka shaqada. Waxaad cabasho ku diri kartaa Ururka Garyaqaanada onleenka [www.wsba.org/licensing-and-lawyer-conduct/discipline/file-a-complaint-against-a-lawyer](http://www.wsba.org/licensing-and-lawyer-conduct/discipline/file-a-complaint-against-a-lawyer) ama adigoo buuxinayo foomka cabashada iyo adigoo ku dirayo:



## **DIFAACA BULSHADA – CAASIMADA TUKWILA**

City Administrator's Office  
6200 Southcenter Blvd  
Tukwila WA 98188  
206-433-1850  
[publicdefense@tukwilawa.gov](mailto:publicdefense@tukwilawa.gov)

Office of Disciplinary Counsel  
Washington State Bar Association  
1325 Fourth Avenue, Suite 600  
Seattle, WA 98101-2539

Caasimada Tukwila waxaa ka go'an in ay bixiyaan wakiilo tayo leh oo eedeysanaha maskiinka ah.